

Fasalka 5aad

Lama kulmin heerarka fidsan (Fasalka 5aad)

Ardayda heerkani waxa ay ku guulaysteen tiro xadidan oo k timid ah heerarka fidsan ee Heerarka Aqoonta Sayniska ee Minnesota. Siinta odhaah saamayn leh, aragti, iyo/ama taageerada taabashada taasoo siinaysa awood dheeri ah kana dhigaysa tijbada in la dhamays tiro, ardaygu waxa uu kaga qayb gali kraa xirfado ay ku jiraan:

- Aqoonsiga qalabka loo isticmaalo baadhista cilmiga.
- Kala garashada adkayaasha caanka ah iyo dareerayaasha.
- Garashada noocyada da,yoda sida barafka ama roobka.
- Aqoonsiga walxaha kuwaas oo la cusboonaysiin karo
- Magaca dhirta caan ka ah iyo xayawaanada
- Garashada qaar ka mid ah hababka ugu caansan ee nadaafada shaqsiyadeed kaas oo ka hortaga xannuunka.

Qayb ahaan la kulmay Heerarka Fidsan (fasalka 5aad)

Aradayda heerkani waxa ay ku guulaysteen qaar ka mid ah xirfadaha heerarka fidsan ee Heerarka Aqoonta Sayniska ee Minnesota. Siinta odhaahyo joogta ah, iyo/ama taageero taabasho tasoo siin doonta awood dheeri ah oo tijaabada lagu dhamayn karo, ardaydu waxa ay kaga qayb gali karaan xirafado ay ku jiraan:

- Cadaynta u jeedada qalaba loo isticmaalo cilmi baadhista.
- Kala saarida tusaalayaasha adkaha, dareeraha, ama neeftha.
- Cadaynta halka ay ka da,ayntu ka dhacdo ee wareega biyaha
- Aqoonsiga waxoogaa tusaalayaal dib u cusboonaysiin ah, yarayn, iyo dib u isticmaalida walxaha.
- Noocyada dhirta iyo/ama xayawaanada ee ku salaysan dabecadahooda muuqaaleed.
- Garashada hababka qaarkood ee nadaafada qofeed kuwaas oo keena caafimaad.

La kulmay heerarka fidsan (fasalka 5aad)

Aradayda heerkani waxa ay ku guulaysteen qaar badan oo kamid ah xirfadaha heerarka fidsan ee Heerarka Aqoonta Sayniska Minnesota. Siinta odhaahyo aan joogto ahayn, aragti, iyo/ama taageerid taabasho taasi oo siinaysa awood dheeri ah oo tijaabada lagu dhamayn karo, ardaydu waxa laga yaabaa inay kaga qayb qaataan xirafado ay ku jiraan:

- Doorashada qalabka ugu haboon ee loo isticmaalayo cilmi baadhis la siiyay.
- Garashada sida heerkulku u saameeyo isbaddelada xaaladaha maatarka (adke ilaa dareere, dareere ilaa neef, dareere ilaa adke).
- Kala saar da,a iyo ururinta wareega biyaha.
- Caddee dib u cusboonaysiinta sidii xal ay ugu tahay dhibaatooyinka deegaanka ee wasakhda adag.
- Kala saar dhirta iyo xayawaanka adiga oo ku salaynaya dabeecadahooda muuqaaleed.
- Caddee dhowr hab oo ah nadaafada shakhsiyadeed taasi oo ka caawisa ka hortaga jeermiska inuu galo jidhka.

Dhaafsan Heerarka Fidsan (Fasalka 5aad)

Ardayda heerkani waxa ay ku guulaysteen xirfadaha heerarka fidsan badankooda ee Heerarka Aqoonta Sayniska ee Minnesota. Siinta odhaah yar ama waxbaba, aragti, iyo/ama taageero taabasho taasi oo siinaysa awood dheeri ah oo tijabada lagu dhamayn karo, ardaydu waxa ay kaga qayb qaadan karaan xirfadaha ay ku jiraan:

- Doorida qalabka ku haboon cilmi baadhisyo aragtyo kala duwan.
- Fahanka kaalinta uu heerkulku kaga jiro isbaddelada xaaladaha maatarka (adke ilaa dareere, dareere ilaa neef, dareere ilaa adke, iyo neef ilaa biyo).
- Garashada in xaddiga da,a ay saamayso xaddiga ururinta ee wareega biyaha.
- Caddee dib u cusboonaysiin, yarayn, iyo dib u isticmaalid sidii xalka ugu dhow ee dhibaatooyinka deegaanka wasakhda adag.
- Kala saar dabeecadaha isku dhafan ee dhirta iyo xayawaanada.
- Fahanka sida ay nadaafada shakhsiyadeed u keento caafimaad .

Fasalka 8aad

Lama kulmin Heerarka Fidan (Fasalka 8aad)

Ardayda heerkani waxa ay ku guulaysteen tiro xadidan oo kamid ah badi xirfadaha muhiimka ah ee heerarka fidsan ee Heerarka Aqoonta Sayniska Minnesota. Siinta odhaahyo balaadhan, aragti, iyo/ama taageerid taabasho taasi oo siinaysa awood dheeri ah oo tijaabada lagu dhamayn karo, ardaydu waxa kaga qayb qaadan karaan xirfado ay ku jiraan:

- Caddaynta hababka caanka ah ee qaabaynta.
- Aqoonsiga tusaalayaasha caanka ah ee adkaha, dareeraha, ama neefaha.
- Aqoonsiga sii riixida ama soo riixada sidii xoog.
- Fahanka in hababka dhulka la baddeli karo.
- Aqoonsiga in jidhka bani aadamka uu ka kooban yahay xubno.
- Ogaanshaha in cudurro ay jiraan.

Qayb ahan La kulmay Hababka Fidsan(Fasalka 8aad)

Ardayda heerkani waxa ay ku guulaysteen qaar kamid ah xirfadaha heerarka fidsan ee Heerarka Aqoonta Sayniska ee Minnesota. Siinta odhaah joogto ah, aragti, iyo/ama taageero taabasho taasi oo siinaysa awood dheeri ah oo tijaabada lagu dhamayn karo, ardaydu waxa ay kaga qayb qaadan karaan xirfado ay ku jiraan:

- Caddaynta jidadka dadku ay u isticmaalaan hababka caanka ee qaabaynta.
- Aqoonsiga marka uu maatarku maro isbaddel duleed.
- Fahanka in xoogag ay sababaan baddalka socodka.
- Cadaynta sida cimiladu u badasho isbaddelka dhulka.
- Fahamka in jidhka bani aadamku uu ka kooban yahay xubno kuwaas oo leh shaqooyin kala duwan.
- Aqoonsiga in cudurrada ay sobobaan noolayaal.

La Kulmay Heerarka Fidsan (Fasalka 8aad)

Ardayda heerkani waxa ay ku guulaysteen in badan oo ah xirfadaha heerarka fidsan ee Heerarka Aqoonta Sayniska Minnesota. Siinta odhaah aan joogto ahayn, aragti, iyo/ama taageero taabasho taasi oo siinaysa awood dheeri ah oo tijaabada lagu dhamayn karo, ardaygu waxa uu kaga qayb qaadan karaa xirfado ay ku jiraan:

- Caddaynta hababka caana ah ee qaabaynta taas oo laga faa,iido nolol maalmeedka.
- Aqoonsiga marka uu maatarku maro isbaddal kimikaad.
- Tusida in walax ay u dhaqaaqi doonto jiho marka xoog loo adeegsado.
- Fahanka in walax xawaaraheedu isbaddali karo haddii xoog loo adeegsado.
- Caddee saamaynta ay dhagax jabka, xoqanka iyo tuulanku ay ku leeyihiiin isbadalka dhulka.
- Caddaynta xubnaha neefsiga, wareega dhiiga, iyo habdhiska dheefshiidka (e.g.,sambabada, caloosha, wadnaha).
- Fahamka in noolayaasha qaarkood ay ku sababaan cudurro bani aadamka.

Dhaafsan Heerarka Fidsan (Fasalka 8)

Ardayda heerkani waxa ay ku guulaysteen ugu badnaan xirfadaha heerarka fidsan ee Heerarka Aqoonta Sayniska Minnesota Students. Siinta odhaah yr ama waxbaba, aragti, iyo/ama taageero taabasho taasi oo siisa awood dheeri ah oo tijaabada lagu dhamayn karo, ardaydu waxa ay kaga qayb qaadan karaan xirfado ay ku jiraan:

- Caddaynta habab badan kaas oo hababka caanka ah ee qaabayntu ay ka faa,iidaan nolol maalmeedka.
- Caddaynta dabeeecadaha lagu yaqaan maatarka mara isbaddal kimikaad .
- Fahanka in xoogag aan la arkayn, sida isliska ama cuf isjiidadku, ay badali karaan xawaaraha walaxda ama jihadha.
- U kala saar xoogaga mid dheeli tiran iyo mid aan dheeli tirnayn.
- Caddeeyo saamaynta dhagax jabka, xoqida, iyo tuulanku ay ku keenaan qaabka dhulka wakhtiba wakhtiga ka dambeeyaa.
- Fahanka shaqooyinka xubnaha neefsiga, dhiig wareega, iyo habdhiska dheefshiidka (e.g., samababada, caloosha, wadnaha).
- Aqoonsiga in jidhka bani aadamku uu u muuqan karo caafimaad inkastoo ay ku jiraan cuduro ay sababeen noolayaal.

Fasalka Dugsiga Sare

Lama kulmim Heerarka Fidsan (HS)

Ardayda heerkani waxa ay ku guulaysteen tiro xadidan baddi xirfadaha muhiimka ah ee heerarka fidsan ee Heerka Aqoonta Sayniska Minnesota. Siinta odhaahyo balaadhan, aragti, iyo/ama taageero taabasho taasi oo siinaysa awood dheeri ah oo tijaabada lagu dhmeyn karo, ardaygu waxa uu kaga qayb qaadan karaa xirfado ay ku jiraan:

- Aqoonsiga Tijaabo cilmyeed.
- Caddaynta xogta tijaabo.
- Aqoonsiga in xayawanadu ay u baahan yihiin in ay cunaan cunto.
- Ogaanshaha in xayawaan uu saamayn karo deegaankiisa.
- Kala saar faraqa u dhaxeeya laba xayawan oo caan ah oo kala duwan.
- Fahanka in dhirta iyo xayawaanku ay u baahn yihiin biyo si ay u badbaadaan.
- Aqoonsiga in hawlaho bani aadamku ay saamayn karaan dhirta iyo xayawaanka.

Qayb ahaan la kulmay Heerarka Fidsan (HS)

Ardayda heerkani waxa ay ku guulaysteen waxoogaa kamid ah xirfadaha heerarka fidsan ee Heerarka Aqoonta Sayniska Minnesota. Siinta odhaah joogto ah, aragti, iyo/ama taageero taabasho taasi oo siisa awood dheeri ah oo tijaabada lagu dhamayn karo, ardaygu waxa uu kaga qayb qaadan karaan xirfado ay ku jiraan:

- Cadaynta mala-awaal cilmiyeed
- Fahanka in xogta ay faa,iido ku yeelan karto wadaaga helitanka laga helay tijaabo.
- Ogaanshaha in xayawaanku ay tamar ka helaan cunista cuntada.
- Cadaynta afku inuu yahay dhisme loo isticmaalo cunista cuntada.
- Fahamka in xayawaanadu uu soo saaray wada noolaanshaha.
- Ku beego waalidka ubadkooda.
- Fahamka in hawlaho bani aadamku ay ku yeelan karaan samayn togan ama taban deegaanka.

La kulmay Heerarka Fidsan (HS)

Ardayda heerkani waxa ay ku guulaystaan in badan oo kamid ah xirfadaha heerarka fidsan ee Heerarka Aqoonta Sayniska Minnesota. Siinta odhaah joogto ahayn, aragti, iyo/ama taageero taabasho taasi oo siisa awood dheeri ah oo tijaabada lagu dhamayn karo, ardaygu waxa uu kaga qayb qaadan karaa xirfado ay ku jiraan:

- Ogaanshaha in mala-awaal ay inoo hogamin karto cilmi baadhis.
- Caddaynta xog ururin haboon iyo gabogabaynta tijaabo cilmiyeed.
- Fahanka in dhirta iyo xayawaanku ay isticmaalan qaabab kala duwan si ay u helaan tamar.
- Aqoonsiga in qaababka loo isticmaalo in tamar la helaa ay ku jiri karto afka xayawaanka iyo caleeta dhirta.
- Aqoonsiga in noocy o cusubi ay baddali karaan wada noolaanshaha.
- Caddeeyo sifooyinka waalidku u gudbiyo ubadka.
- Ogaanshaha in awooda cunto lagu helaa ay saamyn doonto heerka badbaadada ee xayawaanka.
- Ka hadal khtaraha iyo faa,idada ay howlaho bani aadamku u leeyihiin deegaanka iyo bulshada.

Dhaafid Heerka Fidsan (HS)

Ardayda herkani waxa ay k guulaysteen ugu badnaan xirfadaha heerarka fidsan ee heerarka Aqonta Sayniska Minnesotal. Siinta odhaah yar ama waxbaba, aragti, iyo/ama taageero taabasho taasi oo siisa awood dheri ah oo tijaabada lagu dhameeyo, ardaydu waxa ay kaga qayb qaadan karaan xirfado ay ku jiraan:

- Ka qayb qaadashada in tijaabo cilmiyeed ay soo saari karto xog kala duwan iyo gabo gaboo kala duwan.
- Caddaynta hababka kala duwan ee xayawaanka iyo dhirtu ay ug helaan tamar isticmaalka qaabab kala gaar ah.
- Aqoonsiga in awooda lagu helo cunto, biyo, iyo hoy ay saamayn karto heerka badbaadada ee noolaha.
- Fahamka sida qaababka jidhka ee gaar ka ah ay u caawin karaan badbaadada noolaha.
- Caddaynta saamaynta dhibaatada leh in noocy o cusubi ay haysan karaan wada noolaanshiyo.
- Caddaynta khataraha iyo faa,iidada howlaha bani aadmu ku leeyihii deegaanka.